

Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb,

Waxaan rajeynayaa in qof walba uu la kulmay madadaalo iyo nasasho gu' badqab ah. Waxaan rajeynayaa in qof walba uu ku soo laabtay fasalada—onleen ahaan ama qof ahaan—la cusbooneysiisay oo diyaar u ah in si xoogan loo xiro simistarkaan. Inaga oo u dhow dhammaadka sannad dugsiyeedka 2020-21, waxaan rabaa inaan ku dhiiriyo dhammaan ardaydeena, macalimiinta iyo xubnaha shaqaalaha inay sii wadaan inay horay geliyaan cagtaada ugu wanaagsan oo ku dadaalida guusha waxbarashada.

Waxaan sidoo kale rabaa inaan xasuusiyo qof walba inuu sii wado qeybtiina lagu yareynayo faafida fayraska COVID-19. Fadlan sii wad ku dhaqmid ka fogaanshaha bulsho ahaanta, xiro maaskarooyinkaaga, dhaqo gacmahaaga oo sii wad inaad raacdid [xeeladaha](#) yareynta Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka.

### **Sannad Dugsiyeedka 2021-2022**

Maadaama Degmada qorsheyneyso sannad dugsiyeedka 2021-2022, waxaan tixgelineynaa baahiyada ardaydeena iyo macalimiinta. Waa muhiim inaan sii wadno inaan xooga saarno natiijoyinka ardayga iyo qorshaha 5-ta maalmood ee waqtiga buuxo, waxbarashada qof ahaanta oo dhammaan ardayda sannadka xigta. Waxaan balaarineynaa Machadka FLEX oo bixineyso waxbarashada fogaanta onleenka sida dooqa ardayda dugsiga dhexe iyo sare. Dooqa onleenka waxay ahaaneysaa kordhinta machadka FLEX laakin waxay ku xirantahay guriga dugsiga walba.

Dadaalka la isugu keenayo afkaaraha iyo fikradaha ka imaanayo bulshadeena DCSD ee la xiriirto sannad dugsiyeedka 2021-2022, waxaan marti gelineynaa kulamada hoolka magaalada goboleedka/bulshada ee Abriil 27-29. Hoos waa jadwalka kulamada.

Si looga qeybgalo kulamada onleenka, riix gobolada.

<b>Gobolka</b>	<b>Kormeeraha guud Gobolka</b>	<b>Taariiqda</b>	<b>Waqtiga</b>
<a href="#">Gobolka 1</a>	Marwo Melanie Pearch	27-Abriil	06:00
<a href="#">Gobolka 2</a>	Mudane Trenton Arnold	28-Abriil	06:00
<a href="#">Gobolka 3</a>	Dhaqtar Sean Tartt	29-Abriil	06:00
<a href="#">Gobolka 4</a>	Dhaqtar Antonette Campbell	29-Abriil	06:00
<a href="#">Gobolka 5</a>	Dhaqtar Triscilla Weaver	27-Abriil	06:00
<a href="#">Gobolka 6</a>	Dhaqtar Candace Alexander	29-Abriil	06:00
<a href="#">Gobolka 7</a>	Dhaqtar Rodney Swanson	29-Abriil	06:00

Sidoo kale, fadlan ogow in kulanka hoolka magaalada Abriil ee waaladiinta waxaa dib loo dhigay Maajo 20. Warbixin Dheeraad ah way imaaneyso.

### **Tallaalada**

Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb (DCSD) waxaa la soo ogeysiiyay in Guddiga Caafimaadka Gobolka DeKalb (DCBOH) ay hakinayaan isticmaalka tallaalada Johnson & Johnson, si kastaba, waxay sii wadaayaan inay bixiyaan Pfizer iyo Moderna. Joojintaan waa natiijada dib u eegida xogta Maamulka Cuntada iyo Daawada (FDA) iyo Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka (CDC) ee ku lugleh lix dacwadood oo dhif ah ee la soo wargeliyay, nooca daran ee xinjirowga dhiiga ee ku dhacayo dumarka da’da 18-48. Aastaamaha waxay dhaceen lix illaa 13 maalmood tallaalida kadib.

Fadlan ogow in sida waafaqsan Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Georgia (DPH), ma jiraan mid ka mid ah lixda dacwadood ee ku lug leh shaqsiyaadka oo lagu tallaalay Georgia. Intaas waxaa dheer, sida waafaqsan DPH, dhacdooyinkaan daran waxay u muuqdaan inay aad dhif u yihiin, laakin marka laga reebo taxadarka badan, maamulka tallaalka Johnson & Johnson waa la hakinayaa iyada oo saynisyahanada dib u eegayaan xogta ku haraareysan dacwadahaan.

DCSD waxaa ka go’an badqab, caafimaadka, iyo fayd qabka shaqaalaheena. Waxaan rabnaa inaan hubino in lagu ogeysiiyay xogta sayniska hadeer. Waan sii wadeynaa inaan la shaqeyno DCBOH iyo jaalalka kale—Farmashiga Walgreens iyo Briarcliff—si loo siiyo shaqaalaheena tallaalada Pfizer iyo/ama Moderna sida loo diyaariyay iyaga.

### **Qalinjabinta Heerka Koowaad iyo Heerka Labaad ee 2021**

Waxaan rabaa inaan u hambalyeeyo qalinjabiyayaasha heerka koowaad iyo heerka labaad ee 2020-2021! Dadaalkiina ee 13 kii sanno ee la soo dhaafay waxay sababtay sharafeynada ugu sareeyo ee arday dugsiga sare gaari karo. Aad ayaan kuugu faanaa oo waxaan rajeyneynaa inaan aragno waxyaabaha ugu wanaagsan ee aad sameyneysid mustaqbalka!

DUGSIGA	QALINJABINTA HEERKA KOOWAAD	QALINJABINTA HEERKA LABAAD
Dugsiga Sare Arabia Mountain ( <b>Magnet</b> )	Makayla Johnson	Aderolawe Adeseye
Dugsiga Sare Arabia Mountain ( <b>Dagane</b> )	Ashanti Lawson	Ajah Hentz-Gilmore
Dugsiga Sare Cedar Grove	Etimfon Basse	Karentyn Jenkins
Dugsiga Sare Chamblee Charter ( <b>Magnet</b> )	Matthew Lombardo	Victor Lim
Dugsiga Sare Chamblee Charter ( <b>Dagane</b> )	Richard Von Biberstein	Anika Karim
		Molly Silverman
Dugsiga Sare Clarkston	Kaylor Le	Selihom Araia
Dugsiga Sare Columbia ( <b>Magnet</b> )	Makiya Walker	Camille Williams
Dugsiga Sare Columbia ( <b>Dagane</b> )	Chanelle Taylor	Zaniab Saccoh
Dugsiga Sare Cross Keys	Uriel Cataneda	Jonathan Marquez
Machadka Kuliyaada Hore ee DeKalb	Nirmala Niraula	Thang Huynh
	Moontashir Siam	
Dugsiga Farshaxanka DeKalb	Willa Grace Pevey	Jamine Yvette Ward
		Nia Capers
Dugsiga Sare Druid Hills	Rohit George	William Wainwright
Dugsiga Sare Dunwoody	Megan Vander Wiele	Seung Joo Lee

Dugsiga Sare Lakeside	Katherine Kim	Zakir Ahmedin
Dugsiga Sare Lithonia	Mercedes Fyffe	Jordan Scott
Dugsiga Sare Martin Luther King Jr	Mariana Vega-Alvarez	Ariel McDowall
Dugsiga Sare Miller Grove	Aniya Williamson	Gababa Hassan
Dugsiga Sare Redan	Mahamud Sheikh	Jadah Willis-Davis
Dugsiga Sare Ronald E. McNair	Colby Sidwell	Luis Marcial Guzman
Dugsiga Sare Southwest DeKalb ( <b>Magnet</b> )	Danielle Jones	Aniyah Lee
Dugsiga Sare Southwest DeKalb ( <b>Dagane</b> )	Amisha Martin	Alani Duncan
Dugsiga Sare Stephenson	Marc Lewis	Mason Howard
Dugsiga Sare Stone Mountain	Sandy Huynh	Soe Thiha
Dugsiga Jaatarka Tapestry	Kenda Holloway	Vincent Crosby
Dugsiga Towers	Yesenia Martinez	Morgan Mouzon
Dugsiga Sare Tucker	Benen Cheney	Sofia Khemani

### **Waxbarashada Muusiga**



Waxaan rabaa inaan u hambalyeeyo macalimiinteena muusiga iyo ardayda ee ka go'naantooda heerka sare ee muusiga! Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb waxaa loo xushay sida mid ka mid ah "Bulshooyinka Ugu wanaagsan ee Ameerika ee Waxbarashada Muusiga 2021" Ururka Qaranka ee Ururka Ganacsiyada Muusiga (NAMM). Sharaftaan waxaa suurtoagal looga dhigay dhinaca taageerada muuqata iyo shaqada macalimiinteena, maamulada, waaladiinta, ardayda iyo hogaamada bulshada DeKalb.

Barnaamijka abaalmarinta wuxuu aqoonsadaa dadaalada muuqdo ee macalimiinta, maamulayaasha, waaladiinta, ardayda iyo hogaamada bulshada ee ka dhigay waxbarashada muusiga qeyb ka mid ah waxbarashada si wanaagsan loo-hormariyay. Tilmaamaha waxaa loo sameeyay degmooyinka iyo dugsiyada ee muujiyo balanqaadka sare ee aan caadiga aheyn iyo helitaanka waxbarashada muusiga. Sahar qaranka ah ayaa ku sameeyay NAMM xulashada dugsi walba.

Waxaa mahad leh macalimiinteena muusiga, ardayda, maamulada, waaladiinta iyo hogaamada bulshada ee dadaalkooda!

### **Lacag bixinada Gunnada**

Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo kuwa ku jiro maaliyadeena, waaxyada shaqaalaha iyo waaxyada warbixinta cilmiga farsamada oo balanqaadkooda shaqaalaha DCSD iyo ka shaqeynta dhinaca nasashada lagu hubinayo in shaqaalaha u qalmo ay heli karaan lacag bixintooda gunada gobolka ansixiyay. Sida horaan loo sheegay, shaqaalaha waa inay fishaan inay helaan lacag bixinadooda ee bisha Abriil. DCSD way qiimeeyaan shaqaalahooda iyo tabarucaadooda ku aadan aqoonyahanadeena. Waan idin mahadcelineynaa dhammaantiin!

### **Bisha Wacyigelinta Cudurka maskaxda**

DCSD waxay isku biirisay qoysaska iyo hay'adaha wadanka oo dhan si loogu aqoonsado bisha Abriil 2021 sida Bisha Wacyigelinta Cudurka maskaxda Qaranka. Tani waa fursada lagu sharfayo carruurta iyo dhalinyarada qabo cudurka maskaxda iyo xirfadlayaasha iyaga u adeego. Waan u dabaaldageynaa aqoonyahanadeena aan caadiga aheyn!

Isbuuc wanaagsan, iyo Ramadaan Farxad ah ee ku socoto kuwa u dabaaldago!